IIB MA GALE

# FAAFINTA RASMIGA AH

الجريـــدة الرسميـــة

Sannadka 13aad 13ka Sept. 1985 L. 1 R 9

[illegible] SOOMA[illegible]

لجمهورية الصومال الديمقراطية

FAA[illegible] جريدة شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Soomaa iya gudeheeda · dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qoritaanku F R halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

## K O C E N [illegible]

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

QAYBTA LABAAD

W. M.

XEER

XEER-SHARCI L. 4 ee 15 Agoosto 1985, Wax ka beddelidda Sharciga Nidaamka Dhismaha Dawladda. og; 654

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 51 15 Agoosto 1985, Magacaabid Wasiiro » 657

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IWM.

WASAARADDA WARSHADAHA, 3.9.85, Sumadaha Ganacsiga, AARAN L. 365 » 653

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 5.9.85, Jeeg.Yar. L. 283616 ku qoran Nuur Cis-

MAXKAMADDA G. TOGDHEER, 28.8.85, Lumid Jeeg. War. L. 534355 ku qoran Ciise Cabdullaahi Jaamac L. 367 » 660

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 4.9.85, Lumid Buug Kayd L. 9965 ku qoran Biibi Maxamed Cawad L. 368 » 661

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 7.9.85, Lumid Jeeg.War. L. 661541 ku qoran Maxamed Xuseen Ciise L. 369 » 662

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 31.8.85, Lumid Jeeg.War. L. 59852 ku qoran Asli Xasan Maxamed L. 370 » 663

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 31.8.85, Lumid Jeeg.War. L. 59851 ku qoran Xaliimo Axmed Geelle L. 371 » 664

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 3.9.85, Lumid Jeeg War. L. 0076238 ku qoran Maryan Caydiid Cali L. 372 » 665

QAYBTA LABAAD

## XEER

Xeer Sharci Lamb. 4 ee 15 Ago. 1985 Wax ka bedelidda Sharciga Nidaamka Dhismaha Dawladda

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 69aad ee Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharci Lambar 49 ee 23ka Disemb. 1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Dastuurka JDS

MARKUU ARKAY: Sharci lamb. 14 ee 3 Juun 1962, kuna saabsan Nidaamka Dhismaha Dawladda, iyo Beddelaadyadii ka dambeeyey.

MARKUU ARKAY: Baahida Culus, degdega ahna ee loo qabo in Wasaaradda Maaliyadda loo kala saro laba Wasaaradood.

MARKUU DHEGEYSTAY: Golaha Wasiirrada.

WUXUU SOO SAARAYAA: Xeerka Sharci ee soo socd

Qodobka 1aad

Dhismaha Wasaaradda

Waxaa la abuuray Wasaaradaha soo socda:

1. Wasaaradda Maaliyadda iyo
2. Wasaaradda Lacagta:

Qodobka 2aad

Wasaaradda Maaliyaddu waxay qabanaysaa xilalka soo socda

— Talo ka soo jeedinta siyaasadda ee Dalka iyo kormeeridda arrin kasta ee maaliyad ku lug leh.
— Dersidda iyo abaabulka shuruucda iyo xeerarka la xiriira maaliyadda iyo u hawlgalka horumarinteeda
— Diyaarinta Miisaaniyadda ku talo galka iyo midda Xisaabxirka.
— Hubinta habsami u fulinta kharajyada miisaani/da
— Kormeerka Bankiyada iyo hay'adahha lacagta ee

Qaranka.—

— U j.hagnta lacaga dibedda si waafaqsan siyaasadda Guud ee Qaranka iyo n.daamka Bankiga Dhexe.

— La socodka xaaladaha lacagaha adduunka.

— Sahminta iyo talo ka dhiibashada ilaha dhaqaale ee Maalgelinta ku habboon.—

— U ruwigalka kobcinta dhaqaalaha Guud ee dalka.

— Talo ka dhiibashada shuruucda iyo heshiisyada caa lamiga ah ee uu ka dhalanayo culays lacageed.

— I.aalinta amaahyada iyo deeqaha dibedda. ha ahaadeen lacag ama badeeco hubinta helitaankooda iyo ku bixintooda meelaha loogu talo galay.

## Qodobka 3aad

## Xilka Wasaaradda Lacagta

Wasaaradda Lacagta waxay qabanaysaa xilalka soo socda:

— Xaqiijinta dhaqangelinta shuruucda Canshuuraha ee dalka.—

— Maamulka soo ururinta canshuuraha iyo dakhliyada kale ee Qaranka. nooc kasta ha ahaadeene. iyadoo loo marayo hababka ku sifmaaman shuruucda iyo Xeerarka.—

— Diyaarinta ku talo galka dakhliga ee saldhig u noqo naya Miisaaniyadda ku talo galka.

— ka baaraandegidda shuruucda iyo xeerarka u ballan qaadaya dakhli khasnadda Qaranka iyo talo ka soo jeedinta horumarinta ilaha dakhliga.

— Hawlgelinta iyo kormeerka hay'adaha Qaranka ee loo dhisay dakhli soo gelin iyo kuwa u xilsaaran ilaa linta Canshuuraha.

— Talo ka dhiibashada shuruucda iyo heshiisyada caa lamiga ah ee canshuur dhaaf ku saabsan.

-- U hawlgalka sare u qaadidda garaadka dadweynaha xagga gudashada waajibka Dastuurka ee canshuur bixinta.

Qodobka 4aad

D h a q a n g a l

Xeerkan Sharci wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana loo gudbinayaa Golaha Shacbiga Qaranka si loogu rogo sharci.

Muqdisho, 15 AUg. 1985

Maxamed Siyaad Barre
MADAXWEYNAHA J.D.S.

Xeerka Madaxweynaha JDS lambar 31, taariikh 15 Agoosto 1985, Magacaabid Wasiirro.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: faqradda 7, Qod. 82 ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 49 ee 23ka Disember 1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lambar 14 ee 3da Juun 1962 oo ku saabsan Nidaamka Dawladda iyo beddelaadyadii ka dambeeyey;

MARKUU ARKAY : Xeerka Sharci lambar 4 oo ku saabsan dhismaha Wasaaradda Maaliyadda iyo Wasaaradda Lacagta;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in la magacaabo Wasiirro qabta Wasaaraddaha kor ku tilmaaman;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1aad

1. Jaalle Maxamed Sheekh Cusmaan waxaa loo magacaabay Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda;
2. Jaalle Cabdullaahi Warsame Nuur waxaa loo magacaabay Wasiirka Wasaaradda Lacagta.
3. Jaalle Maxamed Xaashi Cigaal waxaa loo magacaabay Wasiir-kuxigeenka Wasaaradda Maaliyadda.

Qod. 2aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 15 Agoosto 1985

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

WASAARADDA WARSHADAHA

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D.S. Ee Taariikhdiisu na tahay 29.5.79 ee 16 sharciga lr. yahay 26, ee soo baxay Maajo 1979.

ISAGOO ARKAY: Sharciga Sumadaha Ganacsiga No 3 soona baxay 22kii Jannaayo 1955.

ISAGOO ARKAY: Arjiga uu keenay Xafiiska sumada ha Ganacsiga iyo ikhtiraacyada, J/le Cabdulaahi Muuse Xai ahna Wakiilka Shirkadda Aaran (Exports iyo Imports) Taariikh, 7.8.85 Ore 12.30 kaasoo weydiisanaya in loo ilaaliyo Sumadda Ganacsiga ee «AARAN Classes 49;

ISAGOO ARKAY: Xaashidda Tilmaanta Sumadda, Caddeynta Ilaalinta, Xaashidda Wakiilnimada iyo tan Canshuurta Dowladda lagu bixiyey.

WUXUU OGGOLAADAY: In la Diiwaan geliyo lana siiyo Shahaaddo Sumad Ganacsi No.3382
Muqdisho, 3.9.1985

Dr. Cabdulaahi Maxamuud Hiiraad
(Xoghayaha Joogtada ah W.W. & G.)

L. 365

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN

HADDUU ARKAY: In uu dhumay Jeeg Lam. 283616 lagana sameeyey Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed laanta Saddexaad ku jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca Nuur Cismaan Yuusuf sida ku cad warqadda lam. 800379 ka soo baxday Sadexaad Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed.—

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la qiimo tiro lana baa'bi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lam. 283616 lagana sameeyay Laanta Saddexaad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna qoran magaca Nuur Cismaan Yuusuf ayna ku jirto Sh.So. 100.000/=.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Saddexaad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in uu siiyo Jaalle Nuur Cismaan Yuusuf lacagta cadadkeedu yahay Shs. 100.000/= ee ku qorneyd Jeegga kor ku tilmaaman kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo marka go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 5.9.1985

GUDDOOMIYAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 366

MAXKAMADDA G. TOGDHEER BURCO

UJ: Baafin Jeegga W/Lar. 534355

(Guddoomiyaha Maxkamadda G. Togdheer Burco)

HADDUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Baafin J/Wareegga ee Lam. 534355 ee Lumay;

HADDUU ARKAY: Ogaysiinta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Burco Taariikh 28.8.85;

HADDUU ARKAY: Qod. 69,65-) Lumid Jeegga Wareega ee Lam. yahay 534355 kuna jirtay Sh.So. 20,000/ Sh. (Labaatan Kun) kuna qoran yahay J.le Ciise Cabdillaahi Jaamac lagana sameeyay Laanta Burco Taariikh 14.8.85;

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo Jeegga kor ku xusan J.le Ciise Cabdillaahi Jaamac markii ay kasoo wareegto 20 casho ah laguna shaaciyo Xariiska Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LAGA CODSANAYAA

In Jeeggaas cusub ee la samayndoono gacanta laga saaro J.le Ciise Cabdillaahi Jaamac iyadoo la sugayo muddada kor ku xusan.

Burco, 28.8.1985

Guddoomiyaha M.G/Tog. Burco
(Dr. Abuukar Islow Cumar)

Kaaliyaha M.G/Tog. Burco
(Jaamac C. Bille)

L. 367

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

— QAYBTA MADANIGA —

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Buug Kayd dhumay oo lambarkiisu ahaa 9965 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Koowaad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 9.746,67/= uuna iskalahaa Biibi Maxamed Cawad sida ku cad warqadda Lam. 3290 taariikh 2.9.85 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Kiiwaad;

WUXUU XEERIYAY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kaydka Lam. 9965 oo ku qoran Biibi Maxamed Cawad ayna ku jirto lacag dhan Sh.So. 9.746,67/=.

WUXUU FASAXAAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Koowaad in uu siiyo Jaalle Biibi Maxamed Cawad lacagta cadadkoodu yahay Sh.So. 9.746,67/= ee ku qoran Buugga Kaydka ee kor ku tilmaaman kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood laga bilaabo marka go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 4.9.1985

GUDDOOMIYAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 368

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

— QAYBTA MADANIGA —

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Codsiga dusha ku qoran;

HADDUU TIXGELIYAY: In uu dhumay Jeeg Lam. 661541 lagana sameeyay Bangiga Ganacsiga iyo Soomaaliyeed Laanta Xudur kuna jirto lacag dhan Sh.So. 42.000/= kuna qoran magaca Maxamed Xuseen Ciise sida ku cad warqadda Lam. 008583 taariikh 5.9.85 kana soo baxday Laanta X.S.Guud ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee 9.9.1962;

WUXUU XEERIYAY

In la qiimo tiro lana baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lam. 661541 lagana sameeyay Laanta X.S.Guud ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna qoran magaca Maxamed Xuseen Ciise ayna ku jirto Sh.So. 42.000/=.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Xudur ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in uu siiyo Jaalle Suudi Iidle Mahad lacagta cadadkoodu yahay Shs. 42.000/= ee ku qoranayd Jeegga kor ku tilmaaman kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo marka go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 7.9.1985

GUDDOOMIYAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 369

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

— QAYBTA MADANIGA —

GARSOORAHA MAXKA/DA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Codsiga dusha ku qoran;

HADDUU TIXGELIYAY: In uu dhumay Jeeg Lam. 50852 lagana sameeyay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Hodan kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/= kuna qoran magaca Asli Xasan Maxamed sida ku cad warqadda Lam. 824 taariikh 31.8.85 kana soo baxday Laanta Hodan ee aBangiga Ganacsiga Kaydka Soomaaliyeed;

HADDUU ARKAY: Qod 69 sharciga L. 2 ee 9.9.1962;

WUXUU XEERIYAY

In la qiimo tiro lana baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lam. 50852 lagana sameeyay Laanta Hodan ee Bangiga Ganacsiga Kaydka Soomaaliyeed kuna qoran Asli Xasan Maxamed ayna ku jirto lacag dhan Sh. So. 100.000/=

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Hodan ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in uu siiyo Jaalle Cabdi Cumar Ileeye lacagta cadadkeedu yahay Shs. 100.000/= ee ku qornayd Jeegga kor ku tilmaaman kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo marka qo'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS. haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 31.8.1985

GUDDOOMIYAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 370

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
— QAYBTA MADANIGA —
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Codsiga dusha ku qoran;
HADDUU TIXGELIYAY: In uu dhumay Jeeg Lam. 59851 lagana sameeyay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Hodan kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/= kuna qoran magaca Xaliimo Axmed Geelle sida ku cad warqadda Lam. 824 taariikh 31.8.85 kana soo baxday Laanta Hodan ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;
HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee 9.9.1962;

WUXUU XEERIYAY

In la qiimo tiro lana baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lam. 59851 lagana sameeyay Laanta Hodan ee Bangiga aGnacsiga iyo aKydka Soomaaliyeed kuna qodan magaca Xaliimo Axmed Geelle ayna ku jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/=.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Hodan ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in uu siiyo Jaalle Cabdi Cumar Ileeye lacagta cadadkeedu yahay Shs. 100.000/= ee ku qornayd Jeegga kor ku tilmaaman kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo marka go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan wax Ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 31.8.1985

GUDDOOMIYAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 371

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
— QAYBTA MADANIGA —
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Codsiga dusha ku qoran;
HADDUU TIXGELIYAY: In uu dhumay Jeeg Lam. 0076238 lagana sameeyay Bangiga aGnacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Garbahaarey kuna jirto lacag dhan Sh.So. 36.300/= kuna qoran magaca Maryan Caydiid Cali sida ku cad warqadda Lam. 008583 taariikh 2.9.85 kana soo baxday Laanta Xis-Guud ee aBngiga aGnacsiga iyo aKydka Soomaaliyeed;
HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga L. 2 ee 9.9.1962;

WUXUU XEERIYAY

In la qiimo tiro lana baabi'iyo (Ammortamento) Jeegga Lam. 0076238 lagana sameeyay Laanta Garbahaarey ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna qoran magaca Maryan Caydiid Cali ayna ku jirto Sh.So. 36.300/=.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Hodan ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in uu siiyo Jaalle Maryan Caydiid Cali lacagta cadadkeed uyahay Shs. 36.300/= ee ku qornayd Jeegga kor ku tilmaaman kadib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo marka go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag laga keenin.

Muqdisho, 3.9.1985

GUDDOOMIYAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 372